

Ansixinta Lacag-celinta Gargaarka Ku meel gaarka ah Interim Assistance Reimbursement Authorization

| | | | |
|---------------------|---------------------------------|---------------------------------------|-------------------|
| MAGACA MACMIILKA | LAMBARKA DAMAANNADA BULSHADA | LAMBARKA KAARKA AQOONSIGAMACMIILKA | TALEEFOON LAMBAR |
| CINWAANKA WADADA | MAGAALADA | GOBOLKA | KOODHKA DEEGAANKA |
| CINWAANKA WARQADAHA | MAGAALADA | GOBOLKA | KOODHKA DEEGAANKA |

Kalmadda Gobolka waxaa loola jeedaa Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington. Kalmadaha aniga, kayga iyo ani waxaa loola jeedaa macmiilka xagga sare lagu soo magacaabey. Kalmadda SSA waxaa loola jeedaa Maamulka Damaannadda Bulshada. Kalmadda SSI waxaa loola jeedaa Dakhliga Damaannada Dheeriga ah ee Damaannadda Bulshada, taas oo ah barnaamijka dakhliga dheeraadka ah ee dawladda dhexe. Kalmadda Gargaarka Ku Meel Gaarka ah waxaa loola jeedaa lacag-bixinada lacagta caddaanka ah ee gebi ahaan lagu maalgeliyo maalgelinada gobolka ee uu bixiyo gobolka ama ayadoo la matalayo macmiilka si loo baahi tiro baahiyada aasaasiga ah ee macmiilka taas oo goor dambe labo isku mid ah looga dhigo lacag bixinta bilowga ama lacag bixinta SSI ee dib loo soo celiyay.

Maxaan ku ansixinayaa saxiixidda aan saxiixayo foomkan?

Haddii aniga la ii arko in aan u-qalmo qaadashada lacag-bixinada SSI, waxaan fahansanahay in aan u oggolaanayo Wakiilka SSA in uu ka siiyo Gobolka lacag-bixinadeyda SSI ee dambe, caddad lacag ah oo la mid ah caddadka lacagta gargaarka dadweynaha gobolke ee aan qaatey.

Gobolka ma leeyahay awood uu igaaga doonayo in aan saxiixo ansixintan?

Haa. Saxiixidda ansixinta waa shuruud la isaga baahan yahay u-qalmitaan gargaarka lacagta caddaanka ah ee uu bixiyo gobolka sida ay qabaan sharciyada WAC 388-400-0060 iyo RCW 74.62.030. . Haddii aan diido in aan saxiixo ansixintan, ma heli karo gargaarka dadweynaha ee Gobolka.

Maxaan sameeyaa haddii SSA ay ii soo dirto lacagt-bixinta dambe oo dhammeystiran?

Waxaan fahansanahay in aan heli karin gargaarka dadweynaha ee Gobolka iyo dheefaha SSI isla hal waqti. Marka la ii oggolaado SSI, waxaan fahansanahay in gargaarka dadweynaha ee Gobolka uu noqonayo deyn la igu leeyahay oona igu waajibta in aan bixiyo. Haddii aan helo lacag-bixinada dambe ee SSI ee aanan la dhimin si dib-u bixin loogu sameeyo Gobolka, waxaan ka wacayaa Xafiiska Helitaanka Maaliyaadda 1-800-562-6114 waxaana raacayaa tilmaan-bixinadooda ku saabsan sida dib loogu bixiyo deynta.

Muddo intee le'eg ayay ansixintan dhaqan galeysaa?

Ansixinta waa in ay saxiixaan aniga iyo wakiilka gobolka si ay u ansax u noqoto. Waxay khasab ku tahay Gobolka iyo aniga in aan cadeecno hal sanno kalindaariye laga bilaabo taariikhda Gobolka uu helo oo aniga aan oggolaado in aan dalbado SSI inta lagu guda jiro waqtigaasi.

Marka codsiga SSI la dalbado, ansaxintan waxaa siisoconaya in ay ansax ahaato ilaa:

- Aan ka helo lacag-bixintayda SSI ee ugu horeysa; ama
- Anigana ma dalbanin codsi dib-u hubineed ama rafcaan maamulka la xiriira waqtiga ugu badan ee la oggol yahayna in la gudbiyo wuu dhacay; ama
- Gobolka iyo aniga waxaan oggolaanay in aan joojino ansaxintan.

Ansixintan khasab iguma aha aniga haddii Gobolka uusan ku wargelinin SSA 30 maalmood gudahooda ee taariikhda aan saxiixay ansixintan.

Ansixintan ma u adeegtaa sidii soo gudbin ka hortag loogu talagalay dheefaha SSI?

Haa, haddii aanan hore u dalbanin codsi SSI, SSA waa in ay oggolaato foomkan ayna u isticmaasho taariikhda aan saxiixay ansixintan sidii taariikhda aan dalbadey SSI haddii aan dalbado codsi SSI 60 maalmood gudahooda ee taariikhda aan saxiixay ansixinta. Haddii aanan dalbanin codsi loogu talagalay dheefaha SSI 60 maalmood gudahooda, ansixintan ma difaaceeyso taariikhdeyda dalabka ee loogu talagalay SSI.

Waxaan xaq u leeyahay Dhageysi Maamulka la xiriira haddii aan ku khilaafdo tallaabada uu qaadey gobolka ee khuseysa ansixintan.

| | |
|-----------------------|---------------------------|
| SAXIIXA MACMIILKA | TAARIIKH |
| SAXIIXA WAKIILKA DSHS | TAARIIKHDA AY HESHAY DSHS |

